

# Uqalmitaanka Kaalmada Ardayga

Wax badan ka ogow sida loo codsado kaalmada dhaqaalaha marka aad ku biirayso Koleejka Gaarka loo leeyahay ee Xirfadaha lagu barto.

## Muhiim!

Haddii aad raadinayso kaalmo dhaqaale oo dhanka waxbarashadaada ah, hubso in aad taqaano shuruucda iyo khattaraha la xidhiidha. Isu diyaari sidii aad usoo celin lahayd dayntaada iskagana ilaalin lahayd tuugada iyo tuugada xogtaada aqoonsiga kaa xadaya. Ilaasho macluumaadkaaga gaarka ah. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, la xiriir Alberta Student Aid.

## Guudmar

Ardayda dhigata [barnaamijyada koleejyada gaarka ah ee lagu barto xirfadaha ee liisanka haysta](#) waxay xaq u yeelan karaan kaalmada gobolka iyo tan federaalka si looga caawiyo sidii ay iskaga bixin lahaayeen lacagta waxbarashada, lacagyawga kale, buugaagta iyo kharashaadka nolosha.

Ardayda ka dhigata barnaamijyada bilaa liisanka ah koleejyada lagu gaarka ah ee xirfadaha lagu barto xaq uma lahan kaalmada ardayga.

## Noocyada kaalmada ardayga

Ardayda labada galinba iyo kuwa galinka waxbarta ee uqalma waxay heli karaan dayn iyo deeqo isku jira.

- Daymaha waa in aad soo celisaa kaddib marka barnaamijyadaadu dhamaadaan, xattaa haddii aadan dhammaystiran barnaamijka.
- Deequhu uma baahna in aad soo celiso haddii aan uqalmitaanka aad uqalantaa isbaddalin.

Tirada lacagta aad helayso waxay ku xiran tahay xaaladahaaga dhaqaale iyo kuwa tacliintaba. Waxaa jira daymo sannadle ah iyo kuwo waligoodba ah, taasoo micnaheedu yahay in aadan heli doonin daymo waxbarasho oo kale ilaa inta aad baaqiga lacageed ee kugu haray aad ka bixinayo.

Haddii aad haddaba hesho kaalmooyin kale oo dhanka dakhliga ah oo kaaga imaanaya dowladda Alberta, waad waayi kartaa kaalmadaas haddii aad codsato kaalmada ardayga. La xiriir shaqaalaha qaabilsan kiiskaaga si aad u hesho wixii macluumaad ah kahor inta aadan codsan.

## Kahor intaadan codsan

- Baar koleejka gaarka loo leeyahay ee xirfadaha gaarka ah ee aad qorshaynayso in aad ku biirto.
- Eeg in barnaamijyada uu bixyo ay waafaqsan yihiin yoolkaaga xirfadeed iyo in kale.
- Fiiri in shahaadooyinku yihiin kuwo la aqoonsan yahay si ay kaaga caawiyaan inaad dhisto xirfadaada.
- Faham [xaquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga](#) iyo kuwa koleejka.
- Soo ogow in [dugsiga iyo barnaamijku u qalmaan kaalmada ardayga](#).
- Soo ogow in aad [u qalanto kaalmada ardayga iyo in kale](#).

## Ka taxaddar oo ka ilaali naftaada musuqa

Waa muhiim in aad naftaada iyo macluumaadkaaga gaarka ah ka ilaaliso xatooyada ama musuqa xogta aqoonsigaaga. Adiga aaya mas'uul ka ah xogta aad kusoo gudbinayso codsiga daynta ee ardayga.

- Kaliya ka si onleen ah uga codso websaytka Kaalmada Ardayga ee Alberta.
- Adigu soo gudbiso codsigaaga.
  - Qofna ha u ogolaan in uu kuu xareeyo codsiga kaalmada ardayga. Dadkan waxaa kamid ah shaqaalaha iyo dadka shaqaalaha qora ee koleejka gaarka loo leeyahay ee xirfadaha.

- Hala wadaagin macluumaadkaaga gaarka ah qof aadan aqoon (akoonka bangiga, lambarka caymiska bulshada ama macluumaadka daynta ardayga).
- Haddii aad u bahaan tahay caawimo, ka wac Xarunta Adeegga Kaalmada Ardayda Alberta 1-855-606-2096, Xulashada 1.
- Xaqiji in macluumaadka aad kusoo gudbinayso codsigaagu yahay mid xaqiqo ah oo sax ah. Bixinta macluumaad been iyo marin habaabin ah waxay horseedi kartaa joojinta maalgalintaada ama waxay keeni kartaa dacwad fal danbiyed ah.
- Kusoo wargali musuqa iyo xatooyada xogta aqoonsiga [Student Aid](#) isla markiiba haddii aad u malayso in lagu soo bartilmaameedsaday.

## Sida loo codsado

- Wuxaad labadaba kaalmada ardayga ee gobolka iyo tan federaalkaba si onleen ah uga codsan kartaa [studentaid.alberta.ca](#).
- Waxaa lagaa rabaa in aad hal codsi soo gudbiso.
- Waa in aad acoon la hubiyay ka furataa Alberta.ca si aad u gasho hanaanka codsiga.
- Raac tilmaamaha tallaabo-tallaabada ah.

## La xidhiidh

Si cid la aamini ay codsigaaga kaaga caawiso, wac:

[Xarunta Adeegga Kaalmada Ardayga ee Alberta](#)  
Si bilaash ah uga wac Waqooyiga Ameerika: 1-855-606-2096